

Maxaa muhima in laga fakaro?



Diyaar ha kuu ahaado heshiis mar kasta.

Waa muhim inaad mar kasta heysataa heshiis. Waxa heshiiska ku cad inta ay tahay kirada aad bixiso, muddada heshiiska iyo tan jabinta heshiiska.

Diyaarso shahaadooyinkaada oo dhan.

U diyaari milkiilaha guri ee mustaqbalka ee u baahan kara warqado caddeynaya mushaarkaada, shaqada, ama waxbarashada iyo caddeyn shaqsi ee xafiiska canshuuraha.



Ka taxadar!

Waligaa ha bixin kiro guri aadan heshiiskiisa heysan. Ha bixin lacag inta aadan helin furayaasha. Iska eeg in qofka aad ka kireysaneyso guriga uu xaq u leeyahay inuu kireeyo guriga.




Hadduu shaki kaaga jiro, weydii shaqaalaha –
waan jecelnahay inaan ku caawino.

SHIS Bostäder 

Vägen till egen bostad

Information till dig som söker boende



Waxaad deggen tahay SHIS adigoona guri ka raadsanaya suuqa caadiga ee guryaha. Taa micnaheedu waa inaad joogto u raadsato guryo kale intaad halkan deggen tahay.

Shaqaalaha SHIS ayaa kaa caawinaya oo ku tusinaya sida guriga loo raadsado. Laakin adigay ku saaran tahay mas'uuliyadda inaad guri hesho.

Maanta bilow! Waa muhim inaad joogto u raadsataa guri.

Sideen ku helaa guri?


Sida ugu badan ee lagu helo guri gacan koowaada waa iyadoo la galo saf guri.

Waa inaad iska diiwaan gelisaa saf isla markaana aad joogto u raadisaa guri.

Waa muhim inaad joogto u raadisaa guri, gashaa meelaha aad iska qortay kuna wargelisaa inaad dooneyso guri.

Sida ugu badan ee loo helo guri gacan labaada ama hal qol waa adigoo ka raadinaya xayeysiinta guryaha ee internetka. Waxa jira bogag badan ee internetka oo xayeysiya guryaha. Weydii shaqaalaha haddii aad dooneyso inaad hesho liiska bogagga kala duwan ee xayeysiinta guryaha.

Waa muhim inaad isticmaasho dadka aad xiriirka la leedahay markaad raadineyso guryo. Inaad raadineyso guri ama qol u sheeg saaxibadaa iyo dadka kula shaqeeya. Ka raadi baraha bulshada, tusaale ahaan ku qor Facebook inaad guri raadineyso.



Waa muhim inaad maskaxda ku heyso inay SHIS tahay tixraac markaad raadsaneyso guri. Tixraac micnaheedu waa in milkiile guri na soo wici karo si uu noo weydiiyo inaad tahay qof wanaagsan oo guri laga kireyn karo.



- Kirada waqti maku bixin jirtay?
- Ma lagaa soo cawday?
- Ma daryeeshay guriga?

Tixraac wanaagsan waa muhim markaad guri raadineyso.

Way adag tahay in la helo guri haddii lagugu leeyahay deymo kiro.

Haddii aad qabto dhibaato la xiriirta deymaha kirada waxaad taageero ka heleysaa degmada iyo SHIS.

Weydii mas'uulka gurigaada haddii aad u baahan tahay inaad ballan ka sameysato la taliyaha miisaaniyadda iyo deymaha.

